
# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

## Ciise waa Macalin Weyn



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: E. Frischbutter, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org


©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Ciise wuxuu ahaa macalin weyn
– abid kii ugu wanaagsanaa.
Dadka isku soo ururray wey
dhegeysan jireen Isaga.




Ciise wuxuu u sheegi jiray naxariis, wanaag iyo raxmad. Qaar baa laga yaabaa in lagu nici jiray oo lagu waxyeeleen jiray iyaga, laakiinse Ilaah baa ka ilaalin jiray iyaga.



Ciise wax badn buu baray. Wuxuu yidhi dadka Ilaah waxay u ifayaan sidii shumaca uga nuuro aqalka. Muxuu ka badeli karaa shumaca markii la shido aqal mugdi ahaa!


Ciise wuxuu kula hadlay dadkii rumeysnaa aargudhashada. "Sidii ilba il, ilikna ilik." Lakiinse Ciise waxa uu baray iscafinta iyo jacaylka, xitaa haddii ay yihiin cadawyadooda.





Waagii Ciise joogay, dadla qaar ka mid ah waxay matali jireen iney yihiin qudduus, markii ay lacagta siinayaan dawarsadayasha, waxay wadan jireen qof Trumbo cod dheer dhawaajiya si ay cid walba u arakto. "Adigu wax ma u bixisaa si qarsoon, oo Ilaah baa kuugu abaal marin donna,"
Ayuu Ciise ku yidh.

Sidaas oo kale Ciise wuxuu baray salaadda. Qaar baa ku tukan jiray waddooyinka cadhiidhiga ah koonayaashooda si ay u arkaan dadkaa hareer maraya.

Dan maysan ka gali jirin Ilaah, dantooda waxay ahayd waxa dadka kale u arkaan iyaga, Ciise wuxuu ugu yeedhay iyaga laba wajiilayal – been jilayaaal.



Ciise inta badan wuxuu u isticmaali jiray Waxbarididiisa sharaxaad dabiici ah. Tusaale, wuxuu ku tilmaami jiray shimbiraha. “Aabbahaagii janada ku jira ayaa quudiya iyag.” Ha ka welwalin, Iaal ba ku quudin doonee.



“Xitaa boqor Suleymaankii taajirka ahaa quruxdooda oo kale uma labisan jirin ubaxyada. Miyuusan Isaga kuu labisi karin? Ciise dadkii wuxuu baray inay Ilaaha wax siiya aaminaan wax walboo ay uga baaahan yihiin.



"Haddii aad u xukuntid walaalkaa, waxay la mid tahay inaad ka bixineyso saxar isaha kaga jira adiga qudhaada oo falar weyn oo qori ah ishaada ku jira," Ciise ayaa yidhi.  Laga yaabe dadkii hoos bay ka qosleyn.  Lakiin waa inay ka fikiraan micnaheeda.






Ciise dadkii wuxuu yu sheegay inay caawimaad weyddiistaan Ilaah. Addunka ma ka iraa Aabbe dhaga kuusan siinaya haddii ilmahiisa oo gaajoon rooti weyddiisto? Maya! Waxay siinyaan wax wanaagsan. Ilaahayna sidaa oo kale wax wanaagsan buu siinayaa kuwa wax weyddiista.

Ciise, wuxuu ahaa macalin weyn, wuxuuna ka digay waxyaalaha ku saabsan macalinnimada beenta ah.


"Waxay u labistan sidii idaha,"
"Laakinse waa dhurwaayo yeey ah!"
wuxuu yidhi macalimiinta beenta ah waxaa lagu gartaa noloshooda iyo siday u nool yihiinba.



Sheeko ayuu ugu sheegay, Ciise wuxuu tusay dadkaa iyaga ah kuwa adeeca Ereyga Ilaah inay la mid yihiin ninkii aqalkiisa ka dul dhistay dhagaxa adag. Kolkii dabayshii duufaanka ku soo kacday. Markii dhamaataayna, aqalkii uu sidiisii u taagnaa.



Laakiinse ninka doqonka ah aqalkiisa wuxuu ka dhistaa ciiidda korkeeda. Markasy ku dhufato dabaysha, labo ayuu u kala dhacaa sababtoo ah saaskiisa ayaa daciif ah. Ciise dadkii wuxuu ku yidhi kaa waa kan aan adeecin Ereyga Ilaah ayuu la mid yahay ninkaa..



Dadkii isu soo baxay wey la yaabeen ereyadii Ciise. Mana aysan horey u maqlin weligood waxyaalaha hadda ka hor. Iminkana waxay garteen inaysan horey ugu filnayn inay maqlaan Ereyga Ilaah. Waxaana ku waajibay inay adeecaan maalin walba.



Ciise waa Macalin Weyn

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Matayos 5-7, Luukos 6

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

# Dhammaad

42

60

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16